# Golaha Wakiiladda

## WAAXDA SHURUUCDA, HADAL-QORAALKA IYO FADHIYADA

**Kal-fadhigii 45aad fadhigii --aad**

***Sabti, 23 March 2021***

**Quraanka: -** Md. Obsiiye

**Gudoonka: -** Gudoomiye Baashe M. Faarax

**Ajandaha Fadhiga:-**

- Doodda Xeerka Shaqaalaha Dawlada

**Md C/qaadir Jaamac Xaamud** *(5min 25sec):-* Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Shir-guddoonka, Mudanayaasha, Shaqaalaha iyo saxaafada, waxaan idinku salaamayaa Salaanta Islaamka Salaamu Calaykum Warax Matulahi Wa Barakaatu.

Xeerkani waa xeer balaadhan tallo soo jeedintuna si wanaagsan ayey u shaxaysan tahay, tusaale ahaan Qodobka u hereeya waxaanu ku soo darnay,

**Erggis"** waxa loola jeedaa marka shaqaale baahi darteed uga hawl galo hay'ado kale. Ereyga shaqaale oo u dhignaa sidan:

**Shaqaale"** Shaqaale dawladeed waxa loola jeeda waa shaqaalaha joogtada ah oo ka shaqeeya hay'adaha kala duwan ee Qaranka.

Waxaynu ka dharagsanahay in kasta oo shaqaaluhu badan yihiin, haddana dhinac ayey ka raran yihiin waxay ahayd in Biyaha la wada cabo.

Ueedada xeerka, U jeedada xeerkan waxa ka mid ah in la helo xeer hufan oo ku haboon oo si caddaalad ah loogu maamulo guud ahaan shaqaalaha dawladda Somaliland,

In lagu qeexo qaab dhismeed shaqaalaha, awoodaha iyo waajibaadka shaqaalaha Dawladda.

In la qeexo nidaamka xulista shaqaalaha iyo nidaamka magacaabista iyo dalacsiinta, abaal marinta iyo ruqsadaynta, qaybaha darajooyinka, fasaxyada, anshaxmarinta iyo

cabashooyinka shaqaalaha dawladda. Sido kale lagu qeexo xuquuqda iyo waajibaadka shaqaalaha dawladda.

**Md. Siciid Maxamed Cilmi** ***(9min 50sec):-*** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Shir-guddoonka, Mudanayaasha, saxaafada, Xoghaymaha, iyo Martida kale dhammaan, waxaan idinku salaamayaa Salaanta Islaamka Salaamu Calaykum Warax Matulahi Wa Barakaatu.

Aniga warbixintaydu way kooban tahay hal Qodob ayaanan soo jeedinayaa in wax ka beddel lagu sameeyo. Xeerku qaabka u dhisan yahay oo kale oo dhan wuu I deeqay, laakiin qodobka 4aad ee xeerka in wax ka bedel lagu sameeyo Guddoomiye iyo xildhihaano ayaan soo jeedinayaa, Qodobka 4aad afarqadaiisa 5aad shaqaalaha Parliament (Guurtida iyo Wakiilada) si wanaagsan ayey u qoran yihiin, laakiin waxaan soo jeedinayaa in lagu daro:

Shaqaalaha Parliament (Guurtida iyo Wakiilada), Shaqaalaha Hanti dhawrka Guud ee Qaranka iyo shaqaalaha Banka dhexe, iyadoo loo raacayo 36aad iyo 52aad ee Dastuurka iyo xeer hoosaadyadooda iyo xeerka Banka 54/2012 iyo Xeerka Hanti Dhawrka Guud 76/2016. (3 xildhibaan ayaa taageeray).

Inama hadal kama taagna shaqalaha labada Gole in si gaar loogu daayo Golaha Wakiilada iyo Golaha Guurtida, sidoo kale waxa muhiim ah in labadan hay'adood ee kale oo ah Hanti dhawrka iyo Banka Dhexe, waana laba hay'adood oo ka duwan xaga sharci ahaan. Banka Dhexe waxa lagu aasaasay Xeer Lr. 54/2012. Xeerkaasi waxa uu muujinayaa qaabka uu shaqaalaha u qaadanayo. Sida caalamka la isticmaalo, Banku waa sida military oo kale. Qofka Bangiga dhexjooga waxa gacanta ku hayaa hawl xasaasi ah (Sensitive), malaayiin doolar ayaa gacantiisa ku jirta.

Qaabka ay ula dhaqmayaan shaqaalaha jooga dawladda hoose ama Wasaarada jooga iyo inanka Qasnada jooga, qaabka loo dhaqmayo ee loo anshaxmarainayo ee loo qadanayo ee loo tababarayo ee loo dabagalayaa waxaad ogaataan waa laba hawlood oo kala duwan, waxa loo maamula sida Military oo kale.

Haddii aad eegto xeerkeenan qofka marka shaqada laga saarayo ama laga joojinayo nidaam dheer (Procedure) dheer ayaa ku qoran, oo galaya ilaa hay'ada shaqaalaha. Muran Banka dhexe ma sugayo hay'ada shaqalaha iyo buuq badan, waxay u baahan tahay cida gacanta ku haysaa ee banka joogtaa si deg deg go'aan uga qaadan karto, waa xasaasi waxa ku jira xisaabaadka dad leeyihii, Xisaabaad Banan kale leeyihiin iyo Xisaabaada Hay'addo iyo Wasaarado leeyihii, mana aha in loola xisaabtama sida inanka jooga Wasaarada Xidhiidhka Golayaasha.

Banku xeer ayuu leeyahay nidaam gaar ah ayuu leeyahay xasaasiyado ayuu leeyahay, waxaan leeyahay Qodobka 4aad farqada 5aad ha lagu soo daro Shaqalaha Banka ee aan Hay'ada shaqaaluhu marayn.

Sidoo kale Hnatid dhawrka waa meel baadhiseed, Hanti dhawrka Guud waxa uu leeyahay Xeerka 76/2016, xeerkaa khariya waxa loo sameeyo qayb dhan oo shaqaalaysiinta ah. Hanti dhawrku gacanta waxa uu ku hayaa baadhis. Haddii muran la galo ama inankan laga joojinayo ama la anshaxmarinayo hay'ada shaqaalaha iska dacweeya, shaqo culus oo xasaasinaya uu gacanta ku hayo oo sir u baahan, oo aaminaad u baahan, oo kalsooni u baahan oo xaaladaheedu deg deg isu bedeli karaan. Nin musuq masuq baadhayaa xaaladuhu siday isu bedelayaan.

Waxaan soo jeedinayaa in labadaas hay'adood iyo shaqaalaha Wakiilada iyo Guurtidu aan lagu soo darin, haddii Xukumadu laga aynu ka madax bannaan waa in shaqalaheenuna ka madax bannaanadaan. Sidoo waa labadaas hay'adoodna ka madax bannaanaadaan.

Waxa la rabaa inuu go'aan madax bannaan qaato. Xeerkan hanti dhawrka 76/216 waxa la hoos keenay Golaha, Madaxweynuhuna waxa uu leeyahay Magacaabis oo kaliya, Hanti dhawrku waxa madax bannaaani leeyahay oo la hoos keenay Guddidan Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hnatida Qaranka, waa in uu baadhi karo dhammaan hay'daha Dawladda iyo hay'ada shaqalaha lafteeda.

Haddii Hanti dhawrihii hay'ada shaqaaluhu xukumayso baadhi kari maayo.

**Waxaan soo jeedinayaa in xeerka lagu darro Qodobka 4aad farqada 5aad madax bannaanida Shaqaalaha Banka Dhexe iyo Hanti dhawrka Guud ee Qaranka.**

**Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in Xeerkan marka intaas lagu darro sidiisa loo ansixiyo.**

**Md Axmed Barkhad Obsiiyey** ***(7 min 36 sec):*** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Shir-guddoonka, Mudanayaasha, Shaqaalaha iyo saxaafada, waxaan idinku salaamayaa Salaanta Islaamka Salaamu Calaykum Warax Matulahi Wa Barakaatu.

Xeerkani waa xeer aad u muhiim ah, waana xeer loo baahan yahay in aynu horumarino intaynu Golaha joogno, xeerkan waxa loo doonayaa si muhiim ah, inta aan xeerka ka qakhriyey wuu fiican yahay, laakiin kalmada carabi ah ayaa ku badan, waxaan loo baahan yahay in aynu baadi doono kalmada soomaali ah oo ku dhaw.

**Qodobka 2aad farqada 13aad** waxa ku qoran "**qylaha joogtada ah**, waxaan loo jeedaa "**Qaybaha joogtada ah"** waa spelling error.

**Qodobka 3aad** halka **Nidaamka** ha lagu beddelo **"Habka"**

**Qodobka 4aad farqada 1aad** halka "**Dabaqaayo"** ha lagu beddelo lagu "**Dhaqaayo".**

**Qodobka 5aad farqada 1aad** halka "**Muwaadin kasta"** ha lagu beddelo **"Qof kasta"**

**Qodobka 4aad farqada 2aad** halka u dambaysa "**Dusha kala socdaan"** waxaan ku beddelay **"La kor joohteeyo"**

**Qodobka 6aad farqada 1aad** xarfaha B) iyo J) halka "**Qawaaniinta"** ha loo beddelo "**Xeerarka"**

Halka **"Masuuliyada"** ha lagu beddelo **"Xil-kasnimo"**

**Qodobka 12aad farqada 4aad** "hay'adaha shaqaalaha dawaldu si ay u gudato waajibaadkeeda waxay yeelan kartaa, hanti guurto ah iyo mid ma guurto ah". **Waxaan ha lagu darro ama labadaba.**

**Qodobka 26aad** labada kelmadood halka **"Hagaha unkida"** ha loo bedelo oo ha loo kala hormariyo "**Unkida hagaha"**

**Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf** ***(10min 14sec)*****:-** Shirku wuu Salaaman yahay ASC, Xeerkan ina horyaal waa xeer aad u baladhan, waa Xeer soo maray Garyaqaanka Guud, waa Xeer soo maray Xukuumada iyo Madaxweynaha oo inoo soo gudbiyay iminkana inaga horyaal, waa xeer ay ku shaqeynayso Hay'adda shaqaaluhu waana xeer ka kooban 69 qodob, Gudideenu si wanaagsan bay uga soo shaqeeyeen oo 19 qodob bay wax ka badashay, si wanaagsan bay u soo dhigtay, waana xeer si wanaagsan u dhigan oo xaqa qof si fiican u sheegaya, sida uu sheegay xildhibaankii iga horeeyayna wixii kalmadaad khaldan ee spelling errors ah ha laga badalo.

**Qodobka 14aad** waxaan u dayn lahaa sidii uu inoogu yimi kuma raacsani siday gudiddeenu u soo badashay, markaa sidii Xukuumada ha loo daayo, isla markaa Gudidda waxaan ku raacsanahay inay ka tuurto **Qodobka 34aad iyo 35aad** waayo qodobada 40aad iyo 45aad baa waxay labadaas qodob ka hadlayaan si wanaagsan oo faah-faahin leh u dejiyay, marka in laga saaro.

Kalmadayo yaryar oo meelaha qaar ku jirjira waxaa fiican in wax laga badalo sid **Qodobka 9aad** khasaare bixinta oo ah qof xoolo dadweyne xaday oo laga magdhabayo, sidii uu qof dilay ayaa la yidhi waa laga magdhabayaa, shaqaalaha dawlada aduunka oo dhan waa ciqaab jeel ah, marka anigu qodobkaas la leeyahay khasaaraha ha laga magdhabo waxaan ku badali lahaa ciqaabta dastuuriga ah ee u taalla in lagu ciqaabo oo aan la odhan geeliisa soo xaraasha ama gurigiisa soo xaraasha.

**Qodobka 17aad** waxaan raacsanahay sidii gudiddu u badashay, laakiin halka ugu dambeysa ee Farqada 3aad ee leh *"xubinta buuxinaysa jagadaas banaanaatay waxa loo raacayaa habkii xubinta banaanaatay loo magacaabay"* waxaan ka dhigi lahaa **"xubinta buuxinaysa jagadii banaanaatay waxay xil-gudashadeedu ku eegtay inta laga soo magacaabayo qofkii ay badashay"**

**Qodobka 45aad** ee Ergis shaqaale (secondment) oo qof Wasaarad u shaqaynayay Wasaarad kale la geeyo looga baahday oo Hay'adda shaqaaluhu intay wasaarad ka keento mid kale gayso, Ergis waa ergo sida marka is-dilo ergo loo diro, marka kalmadaasi meesha ma qabate waxa la qaatay in laga dhigo **"Bedel ku-meelgaadh ah"**.

Hay'addaas Shaqaaluhu waxay gacanta ku haysaa waa shaqaalaha dawlada, halkan waxa jira hay'addo madax-banaan oo Xeer-ilaalintu ka mid tahay, Bangiga Dhexe ka mid yahay, Xeer-dejintu ka mid tahay, Madbacada Qaranka, Wakaaladaha Biyaha, Haamaha Shidaalka iyo Hay'adda Dekaduhu ka mid yihiin, wuxuunba aad iyo aad u doonayaa inaan ka hadlo Hay'addahayaas iyo laaba hay'adood oo Hanti-dhowrka iyo Bangiga dhexe ah oo sidii Xildhibaan Siciid hore u sheegay ayaan aniguna doonayaa inaan wax ka idhaahdo.

Bangiga Dhexe waa unug ka mid ah unugyadan dawlada u shaqeynaya oo gacanta ku haya dhaqaalaha wadanka oo dhan, lacagta sameynaya oo daabacaya, kobcinaya lacagta ajaanibka ee wax lagu soo iibsado oo badinaya, sidii uu sicir bararka ula dagaalami lahaa oo iminkaba 10 kun buu ka soo rugoo 8,450 bay maraysaa, ilaalinta bangiyada ganacisga oo dhan isaga u xilsaaran sidii ay u dhanyihiin, wuxuu bangigu u shaqeeyaa sidii hay'ad caalamiya, Shaqaalihiisa dawlad uma soo qorto ee imitixaan baa laga qaadaa markay u baahdaanba tartan loo galo, waa meesha qudha ee imitixaanada qofkii ku guuleysta loo qaato, xuquuq iyo stamp regulation gaar ah bay leeyihiin, marnaba dawladi gacanta kulama jirto hadaanu halkan eegno iyo hadaan dibada eegnayba, waana isku mid central banks caalamka oo dhamiba, maaha wax hawl yar oo dawladi gacanta soo gali karto.

Madaxweynaha ayaa cayimaya madaxda hay'addahaas oo dhan, dabadeedna waxay raacayaan nidaamkii u degsanaa, marka waxaan sidii Xildhibaan Siciid sheegay ha noqdo hay'ad u lagu taageero inay si madax-banaan hawlaheeda u wadato, xata hanti-dhawrka dawladu ma baadho iyaga, mana baadhi karoba oo waa system gaar ah.

Hanti-dhowrka Guud isna waa la mid oo wuxuu isha ku hayaa Miisaaniyad aynu gacanta u taagno sidii aynu u ansixinay ma u baxaysaa mise u biximayso, iyana waa hay'ad madax banaan oo shaqaaleheeda si madax-banaan u qaadata oo halkay ka shaqeynayso waaba la iska eegayaa, taasina waa wax gaar ah ee yaan la odhan shaqaalaha dawladay ka mid tahay. Intaasaan kaga baxayaa, WSC.

**Md. C/raxman Yuusuf Cartan** *(16min 7sec)***:-** Shir-gudoonka, Xildhibaanada sharafta leh, Saxaafada iyo Mari-sharaftaba waan idinku salaamaya ASC.

Waxaan ka bilaabayaa **Qodobka 10aad Farqada 2aad** waxa ku qoran maalmaha shaqadu waxay noqonayaa 6 maalmood todobaadkii, waxa kale oo ku qoran **Farqada 1aad** saacadaha shaqadu waa 8 saacadood, marka hadii 8 saacadood la yidhaahdo waa 6 subaxnimo ilaa 3 galabnimo inay noqoto wakhtiga shaqadu, marka suurtagal ma tahay inay dawladu shaqayso 6da ilaa 3 saacadood, waxaa taas barbar taal sida caalamku u shaqeeyo oo ah 9 subaxnimo ilaa 5ta galabnimo, marka in la iska qoro 8 saacadood uun oo waliba 6 maalmood ah oo aan la hibin siday u shaqaynayo saacadahaasi, waxa loo baahan yahay inaynu xeerka ku darno saacadaha shaqadu waa 6am ilaa 3Pm ama 9am ilaa 5pm sida caalamku u shaqeeyo, qodobkaas xaga xeerka lagama hadlin, hadii sidaa loo sheegi waayona waxay noqonaysaa wax la iska yidhi, waxaan soo jeedinayaa inaynu isla qaadano xad aynu isla waafaqno madaama aynu xildhibaano nahay sidaa darteed ha laga dhigo baan qabaa **9am illaa 5pm** ama **7am illaa 4pm** oo waliba lagu daro xiliga qadada.

Qaab-dhismeedka Hay'adda Shaqaalaha oo Xeerka **Qodobkiisa 17aad ilaa 23aad** uu ka hadlayo oo la soo dhexgaliyay qaab-dhismeedkii hay'adda, waxaan leeyahay lifaaq ha noqono ugu yaraan ama dee xeer gaar ah oo hay'adda ah ha lagu qeexo. Waxa kale oo aan cadayn awood badan oo hay'addu shaqaalaha ku leedahay, waana hay'ad halka ka dhisan wasaaradihii iyo hay'addihiina halkaasay joogaan side bay ku ogaanaysaa shaqaalihii qof dalacsiin ama dhimis ama wax kale lagu sameynayo ma xafiis bay hay'addihii kale ku yeelanaysaa, taasina ma cadda, hay'd halkaas iska joogta ayaa shaqaalihii maamuleysa cabashadooda iyo hawlohooda macquul maaha, dad badan bay shaqadii ka eriday hay'adda shaqaaluhu hada, marka xal la keenaa oo la yidhaahdaa "xafiiska shaqaalaha Wasaarad iyo Hay'ad kasta waxay hay'adda shaqaaluhu ku yeelanaysaa qof u jooga oo hay'adda u warbixinaya" markaa waxaan soo jeedinayaa in qodob sidaas ah lagu cadeeyo Xeerka.

**Qodobka 24aad Farqadiisa 5aad** oo sheegaysa in hay'ad kasta oo dawladeed soo diyaariso miisaaniyad/kharashaad shaqaale, marka gudoomiye waxaan halka leeyahay Miisaaniyad baynu sameynaa oo ansixinaa sanad kasta, miisaaniyada inoo timaada ee shaqaalaha ka hadlaysa waa inaynu ogaanaa shaqaalaha ku jira, waxa la inoo keenaa iyadoo isku duuban oo intaas oo bilyan ah, waa in mushaharka shaqaalaha lagu soo muujiyaa Miisaaniyada oo Ciidadama, shaqaalaha Dawlada mushaharkooda iyo

darjooyinkooda lagu soo muujiyaa miisaaniyada si aynu u ogaano dadkii inay wax ku nool yihiin iyo inay qatan yihiin, laakiin wax la inaga ansixiyaa duuduub aad moodo dadkii inay adoomo yihiin oo xor u noolayn lacag yarina hayso shaqaalihii, marka waa in darajo kasta shaqaalaha sida A musharkoodu waa intaas darajada B musharkoodu waa intaas lagu soo muujiyo.

**Qodobka 25aad Agaasimaha Guud**, agaasimaha guud qof shaqada dibada ka ah in loo magacaabo maaha, waa in qof gudaha Wasaarada/hay'dda ah loo magacaabo oo gudaha laga magacaabo, maaha in qof suuqa jooga aqoon kasta ha la haadee in loo magacaabo, waa in qof shaqaalaha ahi u dalacaa agaasimaha guud.

**Qodobka 29aad Farqada 3aad** oo ka hadlaysa in hay'addu tixgalin gaar ah siinayso dadka naaftadaha iyo dadka laga tirob adanyahay iyo kooxa la-faquuqo hadii xukuumadu sidaas go'aamisao, maaha hadii golaha xukuumadu go'aamise waa in laga dhigaa hadii xeerku go'aamiyo, tan kale side bay tixgalin gaar ah u siinaysaa maxayse noqoneysaa tixgalintaas dadkaas, ma cadda sida loo siinayo tixgalintaas, ma hadii qof naafo ah iyo qof kale ay imtixaan wadagalaan oo isku darajo keenaan baa kan naafada ah tixgalin la siinaya, waa ra'yi, markaa waa in la caddeyo tixgalinta siday u siinayso, waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo shaqaalaha la qaadanayo hadba waa in qoondo laga siiyo oo la yidhaahdo intaas dadka noocaas ah baa loo tixgalinayaa, marka halka aynu cadeyno.

**Qodobka 30aad Farqada 1aad (D)** waa inuu haysto shahaado dugsi hoose ama wax u dhigma, marka waxaan leeyahay hablaha nadiifisada D ahe ma inay shahaado haystaan baa, waxaan soo jeedinayaa in shahaado lagu wada xidhin dadka ee darejada D waa in aan shahaado lagu xidhin ee laga dhigaa wixii aan shahaado haysan.

**Qodobka 36aad Farqada 4aad** oo sheegaysa in Xeer-nidaamiye lagu faah-faahiyo xadiga mushaharka iyo gunooyinka, dee maxaa Xeer-nidaamiye keenay Xeerkii baynuba haynaaye, marka waxaan soo jeedinayaa in lagu faah-faahiyo xeerkan oo lagu qeexo xalaal maalin baa la qashaa, waa in la qeexo Xadiga Mushaharka darejada A, darejada B oo sidaas u qeexnaa, iminka darejada A Wasaaradaha qaarba waxbay qaataan, sida Wasaarada Caafimaadku 900,000 bay qaataan darejada A, halka Wasaarada Maaliyadu ka qaataan 2 milyan darejada A, waxaynu u baahanahay in darejada la sii jajabiyo oo la yidhaahdo A1 ilaa A12 oo mushaharo kala duwan laga dhigaa sidoo kale darejada B iyo C, oo waliba sanad walba la eego waxay qaadanayaan.

**Qodobka 43aad** ee dalacsiinta oo **Farqadiisa 1aad** sheegayso waxyaabaha lagu dalacsiinayo, marka waxa ka maqan qofka shaqadiisa si hufan uga soo baxa oo u qabsada, waayo waxyaabaha shaqo dhimista ku qoran waxa ka mid ah hadii uu si hufan ama si wanaagsan uga soo bixi waayo shaqadii in la dhimo, markaa hadii uu si hufan oo wanaagsan uga soo baxo waa in lagu dalacsiiyo. Intaas ayaan ku gabo-gabeynayaa, WSC.

**Md. Cali Maxamed Aadan (Calibarre)** ***(11min 40sec)*****:-** ASC, Gudoomiye iyo Mudanayaal ugu horeyn Xeerka wax loogu magac daray sida halkan ku qoran soo gudbinta xeerka shaqaalaha dawlada oo Golaha Wasiiradu soo ansixiyeen.

Shaqaalaha dawlada gudoomiye xeer hore ayaa jiray, maanay dawlado horeba jirin, wixii golayaashii hore iyo wixii aynu intaas soo ansixinaynay ma waxba kama jiraan baa, marka qodobkaas magacu wuu khaldan yahay ee waa in Xeerka loogu yeedhaa Wax ka badalka iyo Kaabis Xeerka Shaqaalaha Dawlada.

Wax kale oo aan wax ka taabanayaa, wixii aan secondment-gareeyay ee Xildhibaanadii hore waa halkooda, Xeerkani wuxuu ka horimanayaa dastuurka qodobiisa 37aad, 52aad iyo 63aad, waxa lagu saleeyay oo kaliya qodobka 90aad ee awoodda Madaxweynaha oo loo cuskaday xeerkan shaqaalaha dawlada, saddex qodob ee hore wuu ka horimanayaa, isagoo awoodda siinaya Madaxweynaha, taasina iska horimaad iyo khalad badan sharcyida dalka ku keenaysa.

Waxa kale oo Xeerkani ka hor imanayaa Xeerkii Bangiga Dhexe, Xeerkii Hanti-dhowrka Guud, Xeer-hoosaadaddii laba Gole ee Wakiilada iyo Guurtida iyo Xeerkii Komishanka Qaranka ee Dastuurka waafaqsanaa intaba Xeerku wuu ka horimanayaa, waana cadaynayaa.

Qodobka 37aad ee Dastuurku wuxuu sheegayaa 1. *"Eebbaha ummadda Somaliland ku beeray geyigani waxa uu ugu deeqay awood iyo karaamo Qaranimo. Shacbiga Jamhuuriyadda Somaliland waxa uu awooddaas iyo karaamadaas sida ku cad Dastuurka u igmaday dawlad ku dhisnaan doonta kuna dhaqmi doonta Dastuurka"* 2. *"Dhi'smaha 'Qaranku wuxuu ka kooban yahay saddex waaxood oo kala ah: Xeerdejinta, Fulinta iyo Garsoorka. Kala xadaynta awoodaha saddexda waaxood waxay noqon doonaan sida uu Dastuurku dhigayo. Waax waliba awoodda Dastuurku u gaar yeelay way u madax bannaan tahay".*

Taas waxa sii cadaynayaa Qodobka 52aad ee Dastuurka oo sheegaya 1. *Golaha Wakiiladu wuxuu yeelanayaa Xoghayn uu madax ka yahay Xoghaye Guud oo aan ka tirsanayn Golaha Wakuada; kana kaalmaynaya Shir-guddoonka Golaha hawlaha xafliska, dhammaan arrimaha maaliyadda iyo maamulka, wuxuuna yeelanayaa Ku-xigeen. 2. Golaha Wakulada wuxuu yeelanayaa la-taliyeyaal sida la-taliye-sharci, dhaqaale, siyaasadeed iwm oo lagu xusho khibrad iyo aqoon ay u leeyihiin hawlohooda. 3. Shaqaalaha kale ee Xoghaynta waxa shaqo gelinaya Xoghayaha Guud marka uu ka helo ogolaansho Shir-guddoonka. Xoghayaha Guud, Ku-xigeenka, Lataliyayaasha iyo shaqaalaha kale magacaabjstooda, xil ka qaadistooda, gunnadooda, iyo xuquuqdooda, waxa Iagu caddaynayaa xeer-hoosaadka Golaha.* Xeerkani wuu ka horyimi Qodobkaas.

Qodobka 63aad ee Dastuurkawuxuu leeyahay "*Golaha Guurtidu waxa uu yeelanayaa Xoghaye aan xubin ka ahayn Golaha. Waxa kale oo uu yeelan karaa la-taliyayaal uu ka mid yahay La-taliye Sharci. Dhismaha xoghaynta Golaha Guurtida waxay la mid tahay ta Golaha Wakiilada.*

Waa tii aan soo akhrinayay ee 52aad, marka Gudoomiye Xeerkani wuu ka horimanayaa labadaas Qodoba, sidaa darteed wixii dastuurka ka horimanaya waa waxba kama jiraan.

Anigu indhoweyto xeerarka kama dooddin oo markaan arkay in wax iska walaaqan yihiin baan iskaga gaabsaday, Xeerka Baniga inaga ansixinay waa xeer jira lamina soo qaadin xaga dhaqanka shaqaalohooda, Marka Gudoomiye Xeerkani wuxuu u baahan yahay in lala akhriyo Xeerka Bangiga Dhexe, Xeerka Hanti-dhawraha Guud iyo Xeerka Komishanka Qaranka oo isagu shaqadiisa u madax-banaan, Agaasimaha Guud ee Komishanka iyaga magacawda xeerkayna ugu taalla, maalin dhowaydna Madaxweynaha iska magacawda mid la eryay iyo mid la geeyayba, waa wax dastuurka ka horjeeda gabigeeduba, aniga cadaynaya taas.

Xeerkii Nidaamka Xukuumada ee Xeer Lr. 71 waa in lala akhriyo Xeerkan. Qodobka 25aad ee Xeerkani meel buu iska soo galinayaa oo wuxuu leeyahay “hadaan si kale xeer loogu sheegin” hadana wixiiba cagtu marinayaa.

Gudoomiye, hadalku wuxuu ku kooban yahay Xeerkani intaas oo Xeer ee aan soo sheegay iyo Qodobadaas Dastuurka ahba wuu ka horimanayaa, sidaa darteed, in la waafajiyo ayaa la doonayaa, magaciisana laga dhigo wax ka badal oo aanu noqon xeer cusub, hadii xeer hore jiray wax ka badal baa lagu sameeyaa, marka dastuurka hadii ka imnayo waa celis, ama Gudoomiye Gudi u saaro xeerarkaaas iyo dastuurka ha la soo saxo, qashin badan baa ku jire intay ka soo saaraan ha soo waafajiyaan Xeerarkaas iyo Dastuurka, WSC.